



Tar: 30-ka Maarso, 2020

BAYAAN RASMI AH

UU SOO SAARAY

**MUDANE XIL. SADIQ XIRSI WARFA, WASIIRKA
WASAARRADDA SHAQADA IYO ARRIMAHA BULSHADA,
JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

OO KU SAABSAN

**SAAMAYNTA DHAQAALE-BULSHO IYO XIRIIRKA
SHAQADA EE CAABUQA CAALAMKA KU FAAFAY
COVID-19 KU YEESHAY SOOMAALIYA**

MUQDISHO, SOOMAALIYA

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada ee Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay halkan ku soo bandhigaysaa saamaynta dhaqaale-bulsho ee caabuqa faafa COVID-19 ku yeeshay Soomaaliya, gaar ahaan xiriirka shaqada. Anigoo tixraacaya tilmaamihii ay soo jeediyeen Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **Mudane Maxamed Cabdullaahi Maxamed Farmaajo**, iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda **Mudane Xasan Cali Khayre** iyagoo si hoggaamin toosan leh dalka ugu hagay la tacaalidda caabuqa faafa ee **COVID-19**, iyo sidoo kale, tilmaamaha toosan ee ku saabsan sida looga hortagayo caabuqan ee ay bixinayso Wasaaradda Caafimaadka & Daryeelka Bulshada, ayaan waxaan doonayaa inaan mar kale ku celiyo in caabuqani aad khatar u yahay ayna tahay in ay aad uga digtoonaadaan dhammaan shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha gudaha Soomaaliya. **SW**

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay qaaday tallaabooyin lagu yaraynayo fiditaanka caabuqa. Waxaa la mamnuucay isku soo baxyada, waxaa la xiray hawada iyo garoomada diyaaradaha iyo goobaha waxbarashada, sidoo kalena waxa la faray bulshadu in ay u hoggaansamaan tilmaamaha nadaafadda ee gacmo dhiqidda, joojinta is gacanqaadka, kala fogaanshaha masaafo ilaa hal (1) Mitir dhan iwm, si looga hortago in uu caabuqu si fudud ugu faafo bulshada dhexdeeda.

Guud ahaan caalamka, waxaa la ogaaday inuu **COVID-19** saamayn daran ku yeeshay suuqyada shaqada. Marka laga yimaado walaacyada deg degga ah ee caafimaadka shaqaalaha iyo qoysaskooda, wuxuu caabuqu saamayn dhaqaale oo taban ku yeelanayaa hawlaha shaqada gaar ahaan saddexdan arrimood:-

1. Tayada shaqada, sida mushaaraadka iyo xaaladaha shaqada;
2. Tirada shaqooyinka ee shaqo-la'aanta iyo shaqo dhimista;
3. Saamaynta soo gaaraysa kooxo gaar ah oo aad ugu nugul suuqa shaqada oo xumaada sida dhallinyarada, dumarka, dadka baahiyaha gaarka ah qaba iwm.

Saamaynaha caabuqa **COVID-19** waxaa markiiba laga dareemay qaybaha caafimaadka, hoteelada, gaadiidka, maaliyadda iyo dhaqaalaha dadban, iyo sidoo kale, hawlaha dawladda. Waxaan la soconaa in ganacsiyada gaarka loo leeyahay, gaar ahaan loo-shaqeeyeyaashu ay caqabad ku noqonayso haynta shaqaalaha iyo wax soo-saarka shaqada. Waxaan ku talinayaa inuusan caabuqa **COVID-19** carqaladayn heshiiska shaqaalaysiinta iyo xiriirka guud ee ka dhexeeya loo-shaqeeyaha iyo shaqaalaha.

Sidoo kale, khataraha ka imaan kara dhimidda ama cayrinta shaqaale iyo yaraynta heerarka wax soo-saar waa kuwa lala socdo laakiin loo-shaqeeyeyaasha iyo shaqaaluhuba waa in ay ahaadaan kuwa muujiya isku-xirnaan iyo isku-naxariisasho si tallaabo kasta oo la qaado ay u ahaato mid midaynaysa bulshadeena.

Waxaan halkaan farriin uga dirayaa dhammaan loo-shaqeeyeyaasha, shaqaalaha iyo guud ahaan bulshada, si aan u yarayno saamaynta shaqada ee caabuqa **COVID-19** ee dalka Soomaaliya:

- 1) Shaqaalaha Dawladda ee bil kasta mushaar qaata sidooda ayey shaqaale ugu sii ahaanayaan Dawladda Federaalka Soomaaliya; *SW*

- 2) Loo-shaqeeyeyaasha gaarka ah waa in ay ku dadaalaan haynta shaqaalaha bil kasta mushaar ka qaata si loo dhiirri geliyo isku-xirnaanta iyo walaaltinimada isla markaana waa in uusan keenin caabuqu burburinta xiriirka shaqada;
- 3) La macaamilka shaqaalaha ku-meel-gaarka ah, dib-u-eegid ayaa lagu samayn karaa iyadoo qaar ka mid ah loo sheegi karo in ay guryahooda joogaan;
- 4) Haddii shaqo ka cayrin ay noqoto lagama maarmaan, shaqaalaha ka tirsan urur shaqaale iyo qaybaha ay qusayso waa in ay isla eegaan qodobbada xiriirka shaqada ee Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 5) Loo-shaqeeyeyaashu waa in uu siiyaa shaqaalaha tababbaro sida looga hortagayo caabuqa **COVID-19**, qalab ka difaacaya faafidda, iyo daawayn shaqaalaha caabuqu haleelo taasoo qayb ka ah waajibka daryeelidda isla markaana waafaqsan tallaabooyinka Bad-qabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada (Occupational Safety and Health);
- 6) Dhammaan shaqaalaha ajaanibta ah ee ka soo laabanaya waddamada uu aadka u saameeyay caabuqu waa in ay u hoggaansamayaan tilmaamaha ay u dejisay Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada sida karantiil qasab ah muddo **14** maalmood ah;

Haddii cayrinta shaqaalaha laga fursan waayo, waa in la raaca habraacyadan soo socda:

1. Dhammaan shaqaalaha cayrintu saamayso waa in la siiyaa ogaysiin waana in habraacu noqdaa mid bani'aadannimo ku jirto laysuguna gudbiyaa hab qoraal ah;
2. Dhammaan shaqaalaha shaqo ka saaridu saamaysay waa in lala tashaday ama la ogaysiiyay go'aanka intaan shaqada laga saarin
3. Shaqo ka fariisin kasta oo kumeelgaara waa inaanay joojin adeegii loo qabanayay loo shaqeeyaha, sidoo kale shaqaaluhu waa inay diyaar u noqdaan inay shaqada kusoo noqdaan marka xaaladu caadi kusoo noqoto
4. Wixii xuquuq ah ee shaqaalaha shaqada laga saaray leeyihiin waa in la siiyaa, hadaan taa cagsigeeda lagu heshiin.

Waxaan ka codsanayaa xirfadlayaasha caafimaadka iyo saynisyahannada in ay siiyaan macluumaad iyo wacyi-gelin joogto ah, shaqaalaha, loo-shaqeeyeyaasha iyo dadwaynaha, *sw*

si looga hortago caabuqa **COVID-19**. Tani waa sida kaliya ee si fiican loogu maarayn karo welwelka, cabsida iyo saamaynta caabuqan ka dhalanaysa.

Waxaan ku soo gunaanadayaa, in aan halkan uga mahadceliyo Madaxwaynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya sida hagidda iyo wacyi-gelinta wanaagsan leh ee ay ummadda ula wadaageen ka hortagidda caabuqan, taas oo wax badan ka taraysa haynta shaqaalaha iyo wadida wax soo-saarka shaqo. Hoggaamiyeyaashayada Qaran way sii wadayaan siinta bulshada Soomaaliyeed talooyinka ku saabsan ka hortagidda caabuqa **COVID-19**.

Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada waxay sii wadaysaa caawinta shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaasha ee arrimaha ku saabsan xiriirka shaqada xilliga lagu guda jiro tallaabooyinka looga hortagayo caabuqa **COVID-19**. *sw*

Illaahow dadkeena ka badbaadi caabuqa COVID-19

Dhammaad